



Ma ka baqaysaa adiguna in khadka internetka lagugu siro?

Khiyaanooyinka ka dhaca khadka internetka waxay
noqdeen wax iska caadi ah. Waxaan halkaan kugu
siinaynaa talooyin muhiim ah oo ku saabsan sidaad iskaga
ilaalin kartid.

Khiyaanooyinka caadiga ah

» Waxaa lagu soo dirayaa email ku saabsan in dhibaato ku timid

akoonkaaga ama inaad ku guulaysatay ciyaar khimaar. Khaa'inku wuxuu rabaa inaad ka jawaabtid emailka ama taabatid linkiga emailka ku qoran oo xogta akoonkaaga ku buuxisid.

Sidaan iskaga ilaali:

Dusha ka mari mawska kombuyuutarka cinwaanka si aad u aragtid in cinwaanka emailka u egyptahay. mid la yaab leh. Ha taaban linkiyada noocaas ah oo ka taxaddar meelaha aad ku qoraysid xogta akoonkaaga.

» Waxaa kusoo wacaya qof iska dhigaya inuu ka socdo Xafiiska canshuuraha iyo diiwaangelinta

kuuna sheegayaa inay canshuur kusoo noqon doonto. Waxaa lagaa codsan doonaa inaad "internetbank" ku gashid.

Sidaan iskaga diffaac:

Haddii qof aadan aqoon kusoo waco oo aadan isku hubin: telefoonka ku dami ama dib uga wac lambar aad ka ogaan kartid. Taasi waxay qusaysaa xattaa markii qofku uu yahay mid aad qaraabo dhow tiihin ama hey'ad kale ka socda, bangi ama shirkad.

» Waxaa lagu soo dirayaa farriin sms u eg inuu ka yimid shirkad boosto oo lagugu guubaabinayo inaad bixisid khidmada baakkadka lagu keenay.

Sidaan iskaga ilaali:

Ha taaban linkigaan, ha ku buuxin xogta akoonkaaga. Haddii aad baakad dalbatay, ka feejignow inaad run ahaantii lacag bixin doontid.

Sidaan isku ilaali

Ilaasho xogtaaad ku gashid

- » Lambarka sirta ah waa kuu gaar marna ma ahan in cid kale loo gudbiyo.
- » Xiro shaashadda telefoonka gacanta, kombuyuutarka iyo kombuyuutarka gacanta, tusaale ahaan kood tiro ah ama farta ku xiro.
- » Lambarro sir ah oo kala duwan u isticmaal app-yaasha iyo akoonada khadka internetka kugu jira. Tusaale lambarrada sirta caadiga ah ee xunxun: 1234, 9999, Pelle19, Fatima82, Tusse2.

Ilaasho BankID-gaaga iyo emailkaaga

- » Marna cid kale ha u gudbin xogta kaarkaaga, koodka aqoonsiga elektorooniga ah (e-legitimation), tusaale ahaan BankID ama xog kale oo xassaasi ah.
- » Bangiyada iyo hey'adaha dawladda marna qofka marka koowaad telefoon ama sms ka lama soo xiriiraan si ay kaaga codsadaan inaad ku gashid BankID ama internetbank.
- » Marna ha taaban linkiyada laga soo diro email ama sms aadan aqoon cidda iska leh. Waxaa ku jira fayrusyo ku dhibaatayn kara.

Booliska ku dacwee mar kasta oo dembi laguu gaysto, wac 114 14.

Markii fal dambiyeed lagu gudo jiro, wac 112.

Kasii akhri wixii ku saabsan amniga khadka internetka

Talooyinka booliska

Boolisku wuxuu talo iyo talobixin kugu siinayaa sidaad iskaga diffaaci kartid khiyaanada khadka internetka:

[https://polisen.se/utsatt-for-brott/
skydda-dig-mot-brott/bedrageri/](https://polisen.se/utsatt-for-brott/skydda-dig-mot-brott/bedrageri/)



Talooyin kale oo ka yimid degmada Göteborgs Stad

Degmada Göteborgs Stad waxaad ka helaysaa warbixin iyo talooyin kor u qaadaya aqoonta kombuyuutarka:

goteborg.se/blimerdigital



*Ku sawir (qabo) telefoonka gacanta koodka-
QR si bogga saxda ah aad u timaadid.*

Ma rabtaa warbixin intaa dheer?

Soo booqo maktabadda buugaagta kugu dhow, xafiiska muwaadiniinta ama goobta ay ku kulmaan (barta kulan) dadka waayeelka ah.